Su'aalaha ugu Muhiimsan:

Muujinta faraqyada u dhexeeya ikhtiyaarada is hagida gudaha Family Care (Daryeelka Qoyska), Partnership (Iskaashiga), PACE iyo IRIS

Dukumentigan waxa uu ka jawaabaa su'aalaha muhiimka ah ee muujiya faraqa u dhexeeya is hagida mid adeegyadiisa Family Care (Daryeelka Qoyska), Partnership (Iskaashiga) iyo Program of All-Inclusive Care for the Elderly (PACE) (Barnaamijka Dhammaan daryeelka Lagu wada jiro ee Waayeelka), iyo IRIS (Include, Respect, I Self-Direct) (Waxaa ka mid ah, Xushmad, Toosinta Nafteeda).

Su'aalaha ugu Muhiimsan: Intee in leeg adeegyadayda ayaan is hagi karaa?

Family Care/Partnership/PACE (daryeelka mudada dheer la maareeyo)

Dadka xusha Family Care, Partnership ama PACE waxay sidoo kale dooran karaan inay is hagaan wax badan oo ka mid ah adeegyadooda iyo taageerooyinka ama waxay dooran karaan inay keliya hagaan adeegyada iyo taageerooyinka ay xushaan.

Ururka daryeelkala maamulo (MCO, managed care organization) waxay sii wadi doonaan inay maareeyaan adeegyada shaqsigu aanu dooran si uu isku hago. Fadlan ogow in qoyska, saaxiibada iyo kuwa kale ay caawin karaan.

IRIS (Waxaa ka mid ah, Xushmad, Toosinta Nafteeda)

Shaqsiyaadka doorta IRIS, is hagida iyo dhammaan adeegyadooda daryeelka mudada dheer iyo taageerooyinka. Qoyska, saaxiibada, la taliyayaashooda IRIS, iyo kuwa kale way caawin karaan.

shaqsigu waxa uu awoodi doonaa inuu helo adeegyada iyo taageerooyinka laga heli kara kaadhka Medicaid oo uu ku daro adeegyadan taageeradooda iyo qorshaha adeega.

Shaqsiyaadka u qalma adeegyada daryeelka gaarka ah waxa uu dooran karaa haddii uu isku hago daryeelka gaarka ah ee is hagida ama isticmaalo kaadhka Medicaid si uu u gaadho daryeelka gaarka ah isagoo maraya wakaalada.

Su'aalaha ugu Muhiimsan: Sidee adeegyada loo bixiyaa?

Family Care/Partnership/PACE (daryeelka mudada dheer la maareeyo)

Wakiil dhexhdexaad ah ayaa isticmaala doolarka uu qoondeeyay ururka daryeelka la maareeyo si uu u bixiyo dhammaan sheegashooyinka ku qoran qorshaha Taageera Iskaa-Toosinta (SDS, Self-Directed Supports) ka dib marka Shaqsiqa uu oggolaado lacag bixinta.

IRIS (Waxaa ka mid ah, Xushmad, Toosinta Nafteeda)

Wakiillka loo shaqeeyaha IRIS (FEA, fiscal employer agent) waxa uu bixiyaa dhammaan dheegashooyinka ku qoran qorshaha adeega iyo taageerada ka dib Shaqsigu marka uu ansixiyo lacag bixinta.

Su'aalaha ugu Muhiimsan: Sidee adeegya iyo qorshaha taageerada loo horumariyaa?

Family Care/Partnership/PACE (daryeelka mudada dheer la maareeyo)

Muddada nidaamka qiimaynta, shaqsiyaadku waxay aqoonsan doonaa adeegyada iyo taageerooyinka ay jeclaan lahaayeen inay is hagaan. Iyaddoo ku salaysan waxa haddii kale ay ka bixin doonto adeegyadaas wada socda, MCO kooxdeeda maaraynta daryeelka ee kala duwan waxay qoondayn doontaa qadarka lacagta Shaqsigu uu isticmaali karo si uu u bixiyo adeegyada iyo taageerooyinka. Shaqsiqa waxa uu sameeyaa qorshaha Taageera Iskaa-Toosinta (SDS) ee muujiya sida ay u hagi doonaan adeegyadaas iyo taageerooyinka.

"SDS Plan" kan waxaa oggolaado kooxda maaraynta daryeelka shaqsiqa.

Kooxda kala duwan ee maaraynta daryeelku waxay sii wadi doonaan inay maareeyaan adeegyo kasta iyo taageerooyinka shaqsiqa aanu dooran si uu isku hago.

IRIS (Waxaa ka mid ah, Xushmad, Toosinta Nafteeda)

ADRC waxay ku wargelisaa shakhsiyaada qiyaasta miisaaniyadooda sanadlaha ah muddada diiwaangelinta la talinta. Gudaha qadarkooda miisaaniyada bilaha ah, iyo caawimada la taliyaha la doortay ee IRS, shaqsiyaadku waxay samayn doonaan qorshahooda adeega iyo taageerooyinka. Wakaalada la talinta IRIS (ICA, IRIS consultant agency) waxay oggolaatay taageerada iyo qorshaha adeega. Shaqsiyaadka hela adeegyada aadka u balaadhan ay ka mid tahay ikhtiyaarka adeega loogu yeedho "Alaabta iyo Adeegyada Habbaysan." Shaqsiyaadka waxay ka codsan karaan Department of Health Services habbaynta qadarka miisaaniyadooda hadidi aanay awoodin inay horumariyaan taageero waxtarleh iyo qorshaha adeega gudaha qiyaasta hore ee miisaaniyada bilaha ah.

Haddii aad doorato sidoo kale daryeelka gaarka ah ee iskaa u hagida ah, miisaaniyad gaar ah ayaa la samayn doonaa iyaddoo la isticmaalayo Agabka Baadhitaanka Daryeelka Gaarka ah. Miisaaniyada daryeelka gaarka waxaa lagu daraa miisaaniyada IRIS.

Su'aalaha ugu Muhiimsan: Miyuu qoyskayga iyo saaxiibada lacag la siiyaa si ay u bixiyaan daryeelka?

Family Care/Partnership/PACE (daryeelka mudada dheer la maareeyo)

Shaqsiyaadku waxay dooran karaan shaqaalahooda, ay ka mid yihiin qoyska, saaxiibada iyo jaarka. Shaqsiyaadkan waa inay buuxiyaan shuruudaha u qalmida ay ka mid tahay baadhitaanada taariikhda hore oo ay yimaadaan tabbar kasta oo loo baahdo.

IRIS (Waxaa ka mid ah, Xushmad, Toosinta Nafteeda)

Shaqsiyaadku waxay dooran karaan shaqaalahooda, ay ka mid yihiin qoyska, saaxiibada iyo jaarka. Shaqsiyaadkan waa inay buuxiyaan shuruudaha u qalmida ay ka mid tahay baadhitaanada taariikhda hore oo ay yimaadaan tabbar kasta oo loo baahdo.

Su'aalaha ugu Muhiimsan: Ma waxaan u shaqaalaynayaa shaqaalahayga si toos ah?

Family Care/Partnership/PACE (daryeelka mudada dheer la maareeyo)

Shaqsigu waxa uu shaqaalayn karaa shaqaale si toos ah ama waxa uu adeegsan karaa wakaalada shaqada la wada qabto oo siin karta caawimada shaqo qorida, baadhitaanka, shaqaalaynta, tababarka iyo eryida shaqaalaha. Shaqsiyaadku waxay sidoo kale iibsan karaan adeegyada iyo taageerooyinka iyagoo u maraya wakaalada.

IRIS (Waxaa ka mid ah, Xushmad, Toosinta Nafteeda)

Shaqsigu waxa uu shaqaalayn karaa shaqaale si toos ah ama waxa uu adeegsan karaa wakaalada shaqada la wada qabto oo siin karta caawimada shaqo qorida, baadhitaanka, shaqaalaynta, tababarka iyo eryida shaqaalaha. Shaqsiyaadku waxay sidoo kale iibsan karaan adeegyada iyo taageerooyinka iyagoo u maraya wakaalada.